
Miyey jirtaa xarako ama cid la yidhahdo wahaabiyyah ?



Markii sheekh Maxammed Cabdulwahaab uu dacwada nashriyey oo dadka ugu yeedhey atbaac badan uu yeeshey dadkii markaa dhaleeceyneyey ee doonaayey dadka in ay ka ceydhiyaan oo ka eryaan ayaa waxa ay ku shaan badeeyeen wahaabiyyah waxayna

yidhahdeen diin cusub iyo madhab cusub ayuu wadaa. Laakin sheekhu wax cusub uu wadey ma jiro. Wuxuu ku khilaafey culumadii ahluk sunnahana ma jirto. Waa dhici kartaa ashyaada qaarkood ijtihaadi ah dee culumada markaa sheyga ijtihaadiga ah ee furuucda ku saabsan mid waliba markaa khada iyo sawaab waa aqbali karaa. Laakin mashaasha ictiqaadiga ah jaadada ahluk sunnaha ayuu ku sugnaa taasaana ayuu ku baaqeyey, taasaanu nashrineyey, taasaana ayuu dadka ugu yeedheyey. Wax kale oo khilaafsana oo dadka ugu yeedheyey ma jirin, laakin shay jadiid ah oo cusub uu waday maadaama aanu jirin in la yidhahdo waa wahaabiyyah sax ma aha.

Wuxuu la mid yahay culumada ahluh sunnaha oo kale. Ahluh sunnuhu xaq ayey ku baaqeyeen ayuu dooneyey in uu ku baaqo oo dadka ugu yeedhaayey taasaanu ayuu dadka u nashrineyey. Sheekhu ma odhan anigu waxaan ahay wahaabi, wahaabiyana yagu iskuma magacaabin. Dadkii khusuumta ahaa baa ku macagaabey oo u bixiyey oo waa dhaleeceyn ay ku dhaleeceyneyaan.

قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: «ألا تعجبون كيف يصرف الله عني شتم قريش ولعنهم! يشتمون مذمماً ويلعنون مذمماً وأنا محمد»

Nebigu wuxuu yidhi صلى الله عليه وسلم xadiiska Bukhaari " Miyey daan ila yaabeyn sida Ilaaahay iga leexiyey dhaleeceynta qureysheed ay dhaleeceyneyso ama caayeyso in uu iga leexiyey miyeydaan la yaabeyn Mudammam mid la dhaleeceeeyey ayey cayneyaaan."

Carwa bint Xarb ooridii Abuu Lahab maxay tidhi ? **مُذَمِّمًا**
أَبِينَا، وَدِينَهُ قَلِينَا، وَأَمْرَهُ عَصِينَا

Mudammam waxa ay naceyaan in ay yidhahdaaan Muxammad. Muxammad waa maxay ? Waa mid in badan la mahadiyey. Mudammamna waa la wazni laakin macnaha ayey lid ku tahay oo waa mid in badan la dhaleeceeeyey. Markaasey waxay tidhi " Mudammam waan diidney" waxay uga jeedaa Nebi Muxammed laakin laftidigu muxuu ku dhacey mudamdam waan diidney " diintiisina waan nacnay"

Markaasuu Nebigu yidhi **يشتمون مذمّما وأنا محمّد** "Mudammam ayey cayneyaan oo ay dhaleeceyneyaan anna Muxammad baan ahay, Mudammamna ma yihi."

Markaa waxa weeyi dadka qaarkood sidii oo kale ayaa Ilaahay uu ka leexiyey. Waxa ay caayeyaan wahaabiyyah ama jadiidiyah ayey caayeyaan waana dacwatu tawxiid weeye oo dacwah salafiyyah weeye. Markaa Ilaahay baa Salafiyyah iyo tawxiid in ay dhaleeceyaan ka leexiyey markaasaa jadiidiyyah iyo wahaabiyyah ayey dhaleeceyneyaan. Markaa xarako wahaabiyyah la yidhahdaa oo jirtaa ma jirto ee waxa weeyi iyaga ayaa cindigooda kaga magacaabey oo ku dhaleeceyey oo saas yadaa ku ganay. Markaa saas ayeyna u jirin. Wuxuu la mid ahaa sheekhu culumada Ahluh sunnaha oo kale ayuu la mid ahaa.

والله أعلم

◆ **Su'aalo iyo Jawaabo Ku Saabsan Caqiidada – الأسئلة والأجوبة حول العقيدة** – daqiiqada 2:12:08-2:15:37



Shaykh Cabdikareem Xasan Xoosh



Masjid Nakhiil- Hargeisa

Manhajonline